



**Taariikhda Maajo 14, 2019, degganayaasha Degmo Dugsiyeedka North St. Paul-Maplewood-Oakdale 622 waxau u codayn doonaan haddii la maalgelinayo hagaajinta dugsiyada degmada oo dhan.**

### **MAXAY TAHAY SOOJEEDINTU?**

Aragtidayadu waa waa la siiyo dhammaan ardayda jawi waxbarasho oo ammaan ah, cusub oo caafimaad qaba. Qorshuhu wuxu:

- Cusboonaysiin goobaha ee dhammaan degmada
- Yarayn dugsiyada hoose ilaa laba dugsi, oo ku xidhnaan doona labadeena dugsi sare
- Isku-celcelin sagaal dugsi hoose oo laga dhigi toddoba dugsi oo waaweyn oo dib loo cusboonaysiiyey

### **Qodobada muhiimka ah:**

- ✓ In lagu daro albaabo ammaan ah dhammaan dugsiyada
- ✓ In la siiyo dhammaan dugsiyada alaab cusub iyo qolal faalal ah oo ku habbaaon kooxo waxbarasho oo yaryar madax-bannaan, iyo kuwa kale oo waaweyn
- ✓ In la dib loo cusboonaysiiyo iyo/ama la ballaadhiyo laba dugsi
- ✓ In la dhiso laba dugsi hoose oo cusubs
- ✓ In la xidho ama hawl kale loo qorsheeyo dugsiyada qaar

### **MUXUU YAHAY KHARASHKU?**

Haddii coddeeyayaashu ansixiyaan codbixintan, cashuurta ku kordhaysa hantiilaha guriga caadiga ah\* wuxu noqon doonaa \$5 bishiiba.

\*\$200,000 qiimaha guriga

## SABABMA AYAANAY U AHAYN?

- Inta ugu badan dhismayaasha dugsiyadeenu waxay jiraan in ka badan 50 sannadood oo uma habaysna deegaanka waxbarasho ee manta.
- Dhismayaal badan ayaa waxay leeyihiin ciriiri gaadiid, ammaan, iyo walaacyo nabadgalyo.
- Qalabka fasalka waxa loogu talagalay casharka, leh dabacsanaan yar ee koox yar, kooxo ballaaran, iyo waxbarashada mid midka ah.
- Dhismayaal ayaa leh saqafyo, baarkino, qalabyo, sistamka kulayliyaha, iyo qalabyada u baahan cusboonaysiinta iyo dayactirka.

## XAQIIQOYINKA MAALIYADEED

- Maxaayeelay waxan bixinaynaa deyntii hore, waxan haysanaa fursad aan dib ugu maalgalinayno dugsiyadeena kharash yar oo dheeraad ah oo laga qaado cashuur bixiyayaasha.
- Wadarta cashuuraha dugsiyeenu way ka hooseeyaan inta ugu badan dugsiyada degmooyinka ee u dhigma—oo waanay ku sii jiri doonaan xataa haddii codbiyayaashu ay ansixiyaan aftidan.
- Waxan kaydinaa cashuurbixiyayaasha in kabadan \$7 milyan anagoo dib ugu maalgalinayna waraaqaha lacagta in ka badan saddexdii sanno ee la soo dhaafay.

## HADDII COD-BXIIYAYAASHU AANAY ANSIXIN AFTIDA

- Dugsigeenu waxay sii wadi doonaan in ay haystaan ammaan, badbaado, iyo la socoshada tabashooyinka gaadiidka.
- Ardayda iyo shaqaaluhu waxay sii wadi doonaan in ay ka shaqeeyaan deegaan waxbarasho oo aan habboonayn, casriyaysnayn, oo aan caafimaadkiisu fiicnayn.

## MACLUUMAADKA CODBIXINTA

Cod-bixintu waxay furmi doontaa 7subaxnimo ilaa 8habeenimo Talaadada, May 14. Codaynta hore waxay bilaabmaysaa Maarso 29. Si aad u hesho goobtaada cod-bixinta, visit [www.mnvotes.org](http://www.mnvotes.org).

## WAXBADAN KA OGOW:

**Booqo** [www.isd622.org/bond2019](http://www.isd622.org/bond2019)

**limaylka** [communications@isd622.org](mailto:communications@isd622.org)

**Wicitaan** 651.748.7629



**School District 622**

NORTH ST. PAUL | MAPLEWOOD | OAKDALE

*Ready for tomorrow*

Udiyaari oo u bixi Degmo Dugsiyeeka 622,  
2520 East 12th Avenue, North St. Paul, MN 55109